



Xafiiska Cabbashada Xabsiga Laanta Socdaalka
(Office of the Immigration Detention Ombudsman) (OIDO)

OIDO waa ilo qarsoodi ah oo masax banaan, oo dhexdhexaad ah, looguna talagalay arrimaha la xariira xabsiga socdaalka gudaha Waaxda Sugidda Ammaanka Mareykanka (U.S. Department of Homeland Security) (DHS).

Maxaa Loola Jeedaa Qofka Loo Gudbiyo Cabbashada (Ombudsman)?

Xafiiska Cabbashada (Ombudsman) waa qof saddaxaad oo si rasmi ah loo magacaabay, oo qarsoodi iyo dhexdhexaad ah, iskunadaya in uu xalliyo ashtakooyinka, dhibatooyinka, ama isfaham la'aanta ka jirta heerarka ugu hooseeyo sida suurtoogalka ah.

Maxaa Loola Jeedaa OIDO?

OIDO qeyb KAMA aha Socdaalka iyo Hirgelinta Kastamka Mareykanka (U.S. Immigration and Customs Enforcement) (ICE) ama Kastamka iyo Badbaadinta Xuduudda Mareykanka (U.S. Customs and Border Protection) (CBP). Waxaan nahay xafiis madax banaan oo ku yaal gudaha Saldhigga DHS. OIDO waxay si madax banaan oo dhexdhexaad ah u fiirisaa kiisaska ay soo gudbiyaan maxaabiista socdaalka, qoysaskooda, wakiiladooda, ama dadka daneeya ee ka tirsan dadweynaha. Waxaan la shaqeynaa kuwena daneeya iyo kuwa wax la qeybsada si ay si muuqata iyo waxqabad leh dadka uga kaalmeyaan ashtakooyinka ku saabsan dhacdooyinka suurtoogalka ah ee dhacay in ay ku sugan yahiiin xabsiga socdaalka kaddibna go'aan ka gaaraan haddii aan bixin karno kaalmo.

Waxaan kaa kaalmeyn karnaa:

- ♦ Jebinta sharciga, heerarka dhaqanka aqoonyaanka, heerarka xabsiga, ama siyaasadaha la xariira xabsiga socdaalka.
- ♦ Dhaqan xumaada suurtoogalka ay ay geystaan shaqaalaha DHS ama kuwa ka qaata qandaraas.
- ♦ Xoogga xad dhaafka ay isticmaalaan shaqaalaha DHS ama kuwa ka qaata qandaraas.
- ♦ Arrimaha kale ee la xariira xaaladaha ka jira gudaha hay'adaha xabsiga la'aanta socdaalka.
- ♦ Jebinta xuquuqda qofka la soo xeray.

Annaga MA AWOODNO:

- ♦ In aan la xariirno qof kasta marka laga reebo qofka la soo xeray ama cidda ka mattasha kiiska iyadoo aan ruqsad laga qaadanin qofka xeran.
- ♦ In aan fiirino kiisaska dhoofinta, codsiyada damaanadda ama xoriyadda ku meel gaarka ee la siiyo qofka xeran, codsiyada lagu dalabado sii deynta, ama arrimaha kale ee la xariira ogolaashada ama dhoofinta.
- ♦ In aan fiirino sababta qofka iminka loo soo xeray ama horay loo soo xeray.
- ♦ In aan kala tallino sharciga.

SIDA LOO CODSADO KAALMO

Badanaa Maamulaha Kiiska OIDO wuxuu soo booqan doonaa hay'adda si uu si qarsoodi ah ula hadlo una dhageysto maxaabista

Waxaad kaalmo ka codsan kartaa Maamulaha Kiiska waqti kast si aad kaalmo uga geysatid xallinta arrimaha jira.

Waxaad weydiin kartaa shaqaalaha hay'adda si taasoo kugu kaalmeyso in aad la xariirtid Maamulaha Kiiska OIDO si aad u codsatid kaalmo.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo
dhs.gov/office-immigration-detention-ombudsman